8

Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn

SOM 008/**2014**

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn

Buuggan macluumaadka waxaa loogu talogalay inuu fahmitaan aasaadi aha kaa siiyo arrimaha sharciga. Maaha wax lagu bedeli karo caawsimaada iyo talada sharci ee qof loogu talogalay. Haddii aad la tacaalayso arrimaha sharci qoys, laguuguma talalinayo inaad sidaad ugu suurtogalsan u fahanto ikhtiyaaradaada ama si aad u dhawrto xuquuqdaada. Macluumaad intaas dhaafsiisan oo ku saabsan sida loo helo ama lacag looga bixiyo qareenka sharciga qoyska, eeg buugga macluumaadka ee ku saabsan " Caawimaad u Helista Qoyskaaga Dhibaatada Sharciga". Sidoo kale waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad milicsato webinaaradayada oo ku saabsan "Raadinta Garyaqaanka Sharciga Qoyska" iyo arrimaha ku saabsan socdaalka. Dhammaan tabaha iyo xeeladaha wax la iskaga dabari karo waxay ku jiraan barta shabakadayada www.onefamilylaw.ca.

Burburka qoysku waa waqti adag oo werwer leh. Haddii adigu ama lamaanahaagu aad Canada ka soo gasheen waddan kale, waxaa laga yaabaa in carqalado sharciga qoyska iyo socdaalka labadooduba ay ku soo wajahaan marka xidhiidhkiinu uu dhammaado. Tusaale ahaan, waxaa suurtogal ah inaad go'aan ka gaadho waxyaalaha ku saabsan taageerada maaliyadeed, sidii aad u maareeyn lahayd carruurtaada ood u kala qaybin lahayd hantida qoyskaaga. Haddii aanad ahayn muwaadin Canadian ah, xuquuqdaada socdaalka ayaa laga yaabaa in lala xidhiidhiyo lamaanahaaga ama xubnaha kale ee qoyskaaga. Waxaa laga yaabaa inaad ka werwerto waxyaalaha ku saabsan:

- haddii aad dhex joogi karto Canada;
- inaad ka tagi doonto carruurtaada;
- sida naftaada loo taageero haddii ay kaa masuul ahayd lamaanahaagu ood soo afjarto xidhiidhka.

Xuquuqda Maxkamadda Qoyska

Socdaale, qaxooti iyo haweenka aan xuquuqda lahayn waxay leeyihiin xuquuq iyo masuuliyaad isku mid ah sida haweenka u dhashay Canada ay uga siman yihiin shariga qoyska. Markaad kala tagtaan lamaanahaaga, waxaa tagi kartaa Maxkamadda si aad u codsato daryeel cunug ama inaad hesho, taageero laguugu siiyo cunugga, qoyska, Ama waxaad waydiisan kartaa in Maxkamadda ku siiso saamiga aad ku leedahay hantida qoyskaaga. Waxaa tagi kartaa Maxkamadda Qoyska dhib ma leh waxay xuquuqdaada socdaalku tahay.

Waa inaad isku sheegtaa haddii aad ka qaybqaadanaysid nidaamka Maxkamadda. Inkastood leedahay xuquuq sharci qoys isku mid ah oo haween kale oo kastaa ay leeyihiin, haddii aanad xuquuq sharci ah aanad ku lahayn Canada, waxaa laga yaabaa inay ku oggaadaan masuuliyiinta socdaalku, oo lagu mastaafuriyo. Xuquuqdaada aad u leedahay si aad u joogto Canada waxay ku xidhan tahay xuquuqdaada socdaalka. Si aad u dhawro naftaada iyo carruurtaada, waxaa u baahan tahay inaad oggaato xuquuqdaada iyo ikhtiyaaradaada.

Burburka xidhiidhka iyo walaaca socdaalka

Marka xidhiidhkaagu dhammaado, xauquuqdaada si aad u joogto Canada waxay ku xidhan tahay xaaladaada socdaal. Qeybtan sharcigu waxay noqotay mid aad u adag in la fahmo. Haddii aad u malaynayso xaaladaada socdaal inay halis ku jirto, waxaa aad u muhiim ah inaad isla markiiba aad la hadasho gar yaqaanka socdaalka si aad u oggaato ikhtiyaaradaada sharci.

Degnaanshiyo Rasmi ah

Haddii lamaanahaagu (aad isku sinji tihiin) oo ay ku kafaalaqaado si aad qof si rasmi u degan aad u noqoto ama xidhiidhkaagu uu dhammaado **kahor** degnaanshiyahaaga rasmiga ah waa la oggolaanayaa, xaaladaada socdaalku halis ayey gali kartaa waxaana lagaa mastaafurin karaa Canada.

Haddii aad hadda ka hor aad si rasmi ah u deganayd, oo aan shuruudo ku xidhnayn degnaanshiyahaaga rasmiga ah markuu xidhiidhkaagu dhammaaday, ma waayisid xuquuqdan ama lagaa mastaafurin mayo Canada isla markiiba waayo waxaad kala tagteen lamaanahaaga. Tani waa dhab xaataa haddii lamaanahaagu uu kafaalo qaaday si aad u timaado Canada.

Haddii lamaanahaagu uu kafaalo qaaday inaad degnaanshiyo rasmiya yeelato oo xidhiidhkaaga aad la leedahay kafiilkaagu uu dhammaado, kafiillkaaga ayaa ilaa iyo hadda kaa masuula muddo 3 sannadood ah ka dib marka laguu oggolaado degnaanshiyaha rasmiga ah. Haddii kafiilkaagu aani awoodi karin amase aanu sii wadi karin inuu ku taageero inta lagu gudo jiro mudadda 3 sanno ee kafiilnimada, waxaad codsan kartaa caawimaada bulshada si aad u taageerto lafahaantaada.

Haddii uu lamaanahaagu ku kafaalad qaado ama xidhiidhkiinu dhammaado, ka taxadir inaad tahay qofka lacag ahaan ka maasuulka ah lamaanahaaga ilamaa 3 sanno ee muddada kafiil qaadista ay dhammaato. Haddii isagu ama iyadu uu sii wado caawimaada bulshada inta lagu gudo jiro mudadda kafiil qaadista, xaataa haddii aydaan wada joogin, waxaa suurtogal ah inaad dib aad lacagtan ugu celiso dawlada.

Deganaanshiyaha Rasmiga ah ee Shuruuda ku xidhan

Lamaanayaasha sida dhabta ah isku kafaalo qaaday ayaa loo oggolyahay inay helaan degnaanshiyaha rasmiga ah ee shuruudu ku xidhan tahay 2 sanno ee ugu horeeya ka dib marka codsigooda degnaanshiyaha rasmiga ah la oggolaado. **Degnaanshiyaha Rasmiga ah ee Shuruuda ku xidhan** waxaa loola jeedaa in lamaanaha la kafaalad qaaday iyo kafiilku ay kuwada noolaadaan xidhiidh dhab ah muddada 2 sanno ka dib marka degnaanshiyaha rasmiga ah la oggolaado. Haddii xidhiidhku burburo inta lagu gudo jiro muddada 2 sanno ah, lamaanaha la kafaalad qaaday waxay/waxay waayi kartaa xuquuqdeeda deganaanshiyaha rasmiga ah.

Degnaanshiyaha rasmiga ah ee shuruudu ku xidhan tahay kaliya ayaa ku haboon lamaanaha haddii:

- codsigooda kafiil qaadista la gudbiyey ama ka dib **Oktoober 25, 2012**; ama
- xidhiidhkoodu uu ahaa **2 sanno ama wax ka yar** markii ay codsadeen; ama
- aanay **carruur isku lahayn** markii ay codsadeen.

Haddii aad ilmo dhasho ka dib markii codsigaaga la gudbiyey, taasi badalimayso shuruuda. Shuruudu waxay ku haboon tahay codsiga kafiil qaadista labada qof ee isqaba ee Canada gudaheeda laga soo gudbiyey ama meel ka baxsan Canada.

Waxaa jira **ka reebanaan** waxyaalaha looga baahan yahay shuruudaha. Haddii aad cadayn keeni karto, waxaa laga yaabaa in shuruuda laga saaro haddii:

- kafiilkaagu uu dhinto;
- xidhiidhkiinu uu burburo kafiilkaagu oo si xun kuula dhaqma ama ku dayaca aawadeed, ama carruurtaada, ama qaraabadaada guriga kugula nool; ama
- haddii kafiilkaagu uu ku guuldaraysto inuu ku xanaaneeyo, ama carruurtaada, ama qaraabadaada kula nool six un ula dhaqmid ama dayaco qof kale oo la xidhiidha kafiilka.

Si xun ula dhaqmidu waxay noqon kartaa jidh, galmo, lacag ee/ama nafsi ahaan. Dayacid waxaa loola jeedaa ku guul daraysashada si loo bixiyo daruuriyaadka nolosha, sida cunno, dhar, daryeel caafimaad, hoy, ama ku guuldaraysasho in la bixiyo shay kasta oo sababa halis aad u daran.

a. Sidee ayaan u codsan karaa ka dhaafista degnaanshiyaha shuruudu ay ku xidhan tahay?

Si loo helo macluumaad intaas dhaafsiisan ama si aad u codsato ka dhaafista degnaanshiyaha ay shuruudu ku xidhan tahay, kala xidhiidh **Muwaadinimada iyo Socdaalka Canada (CIC)** 1-888-242-2100.

Si aad u codsato ka dhaafista kafiilkaaga oo dhintay aawadeed, waa inaad keentaa cadaynta dhimashada ood cadaysaa inaad xidhiidh dhab ah aad kuwada noolaydeen ilaa intii uu kafiilkaagu dhintay.

Si aad u codsato ka dhaafista si xun isticmaalis iyo dayacaad aawadood, waa inaa marka hore soo afjartaa xidhiidhka. Markaad la xidhiidho masuulka socdaalka, waa inaad siisaa macluumaad aad u badan intii aad ka awoodi karto si aad u cadayso si xun ula dhaqmida ama dayacaada. Qaar ka mida tusaalooyinka noocyada kala duwan ee cadaynta waxaa ka mida:

- warbixinta Booliiska
- warbixinta daawada
- Waraaqaha ka socda haweenayda adeeggaha hoyga ama qofkii kale ee bulsho taageere
- waraaqaha Maxkamadda
- Sawiro, eemaylo, fariin cod duuban ah
- Waraaqaha ama kalmado dhaar ah ee markaatiyaal ka socda

Waxaad sidoo kale aad cadayn doontaa inaad xidhiidh dhab ah aad kula noolayd kafiilkaaga ilaa iyo intii uu xidhiidhkiinu dhammaaday six un ula dhaqmid ama dayacaaad aawadeed. Qaar ka mida hababka aad u cadayn karto arrintan waxa weeye:

- waraaqo muhiim ah kuwaas oo muujinaya in cinwaankaagu uu la mid yahay cinwaanka kafiilkaaga (liisanka baabuur wadista, kaadhka caafimaadka, biilka laydhka iyo biyaha)
- warbixin maaliyadeed aad wadaagteen (xisaabaadka baanka, kaadhadhka daynta, Heshiis kiro ama lahaanshiyo hanti)
- Waraaqo ka socda dad idiin aqoonsan inaad tihiin laba qof oo isqaba

Caawimaadaada iyo badbaadadaada, haddii aad ka fikirayso waxyaalo ku saabsan inaad ka tago kafiilkaaga, waxaa muhiim ah inaad caawimaad aad ka hesho ururka haweenka ama hoyga haweenka, iyo talo sharci oo ka socota garyaqaanka socdaalka isla markiiba.

b. Maxaa dhacaya 2 sanno ka dib marka ay dhammaato muddada shuruudu?

Haddii aad heshay degnaanshiyaha rasmiga ah ee shuruuda ku xidhan, oo aad la noolayd kafiilkaaga degan Canada muddo 2 sanno ah, waxaad noqonaysaa qof si rasmi ah u degan oo shuruudo gaar ah aan raacin. Ma waayi kartid xuquuqdaada degnaanshiyaha rasmiga ah ama lagaa masaafurin mayo Canada isla markiiba idinkoo kala tagay lamaanahaaga aawadeed. Kafiilkaaga ayaa sii wadi doona lacag ahaan inuu kaa masuul noqdo ilaa muddada 3 sanno ah ee kafiil qaadistu ay dhammaanayso. Haddii uu lamaanahaagu aanu awoodi karin ama sii wadi karin inuu ku taageero, waxaad codsan kartaa caawimaada bulshada si aad naftaada u taageerto.

> Waxaa muhiim ah inaad xasuusato inta lagu guddo jiro mudadda 2 sanno ee shuruuda, haddii masuuliyiinta socdaalku ay dareemaan inaan shuruudii aan la dhammaystirin, waxay codsan karaan cadayn ay tahay inaad shuruucda raacdo. Dawlada ayaa sidoo kale si bakhtaayo nasiib ah u hubin doonta in lamaanaha la ka faala qaaday uu ilaa iyo hadda xidhiidh haboon kula noool yahay kafiilkeeda.

Xaataa ka dib mudadda 2 sanno markay dhammaato, haddii dawladu ay oggaato inaanad u hogaansamin shuruuda, baadhitaan ayey ku samayn karaan. Haddii ay oggaadaan inaanad u hoggaansanaan shuruuda, halis ayaad ku gali kartaa inaad waydo degnaanshiyahaaga rasmiga ah. Haddii ay arrintani dhacdo, waxaad leedahay fursad aad kula hadli karto masuulka socdaalka oo dacwadaadana la dhagaysto ka hor intaan xuquuqdaada degnaanshiyaha rasmiga ah lagaa qaadin.

Qaxootiyada iyo dadka u baahan dhawrista

Haddii aad degan tahay Canada oo lagaa helo inaad ku jirto axdiga Qaxooti ama aad tahay qof u baahan dhawris, lagaa mastaafurin mayo Canada isla markiiba xidhiidhkiina oo dhammaaday aawadeed.

Haddii aad qaxooti ahaan ugu andacootay lamaanahaaaga ood rabto inaad soo afjarto xidhiidhkiina, waxaad awoodi kartaa inaad kala noqoto andacoodista lamaanahaaga ka hor dacwad dhagaysiga qaxootiga. Si aad u samayso arrintan waxaa kula gudboon inaad hesho garyaqaan. Waa inaad u sheegtaa garyaqaankaaga haddii si xun uu kuula dhaqmay lamaanahaagu, haddii lagugu khasbay inaad saxiixdo wax waraaqo ah, ama aad ka cabsi qabto lamaanahaaga ama xubnaha qoyskaaga degan waddankaaga hooyo.

Haddii qaxooti ku andacoodistaadu ay guul daraysato, waxaa laga yaabaa inaad rafcaan ka qaadato go'aanka qaybta rafcaanka Qaxootiga (RAD). Waxaa jira waqti xadidan oo la xareeyo codsiyada ama la soo gudbiyo dhammaan waraaqahaaga oo dhan. Dhammaan ku andacoodayaasha qaxootinimadu awood uma laha inay isticmaalaan RAD. Tusaale ahaan, codsi uma qoran kartid RAD haddii aad ka socoto meel ay soo magacowday (Safe) Waddanka aad asal ahaan ka soo jeedo (DCO).

Dawlada ayaa samaysay liiska wadamada ay u malaynayaan inay ku ku jiraan "safe" oo lagu magacaabo **Wadamada (Safe) Asal ahaan laga soo Jeedo (DCO)**. Waxaa muhiim ah inaad oggaato haddii aad ka timid DCO waqti ku andacoodis qaxooti aawadeed oo ka socota DCO uu aad u gaaban yahay haddii ku andacoodistaadu uu guul daraysto. Waa inaad kala hadashaa garyaqaankaaga socdaalka waxyaalaha ku saabsan arrintan sida ugu suurtogalsan.

Ma Jiraan xuquuq Sharci

Waxaa laga yaabaa inaad degan tahay Canada adigoon lahayn xuquuq sharci ah. Arrintan waxay dhici kartaa haddii Oggolaanshaha dal ku joogistaadu ama ardaynimo ay dhacsan tahay waqtigeedu, haddii ku andacoodistaada qaxootinimo la diiday, ama aad si sharci daro ah dalka ku soo gashay aawadeed. Inkastood leedahay xuquuq sharci qoys isku mid ah sida ay haweenka kaleba ay u leeyihiin, waa lagu mastaafurin karaa haddii ay ku oggaadaan masuuliyiinta socdaalku. Waxaad awoodi kartaa inaad caawimaad aad ka hesho ururada haweenka ama hoyga haweenka.

Haddii aad ka cabsi qabto in lamaanahaaga ama xubnaha qoyskaaga degan waddankaaga hooyo, ay waxyeelo kaaa soo gaadho, waxaa kula gudboon inaad u sheegto garyaqaankaaga waxyaalaha ku saabsan suurtogal inay tahay inaad ku andacootid qaxootinimo.

Codsiyada Bani'aadanimo iyo Naxariis (H iyo C)

Haddii aanad lahayn xuquuq sharci ama xuquuqdaada socdaal ay khatar ku sugan tahay, hal fursad ayaa la tixgalinayaa oo ay tahay in la sameeyo **Codsiga Bani'aadanimo iyo Naxiirsta (H iyo C)**. Codsiga H iyo C waxaa lagu dhex isticmaalaa xaaladaha gaarka ah si looga codsado dawlada oggolaansho si loo joogo Canada. Codsi samaynta H iyo C kaama ilaalinayso in lagu mastaafuriyo. Waxaa kula gudboon inaad hesho garyaqaan sida ugu suurto galsan. Waxaa laga yaabaa inay jiraan ku andacoodis socdaalo kale oo laguu heli karo, haddba waxay ku xidhan tahay xaaladadaada.

Haddii ay ka dhex jirtay six un ula dhaqmid xidhiidhkiina, waxaa haboon inaad ku sheegto codsigaaga wixii kugu dhacay. Qaar ka mida Su'aalaha lagu dhex tixgalinayo codsiga H iyo C waxay yihiin:

- Xidhiidh adag ma ku leedahay Canada?
- Ma awoodi kartaa inaad dhaqaale ahaan taageeri kartid naftaada?
- Miyaad kala kulmi kartaa in xaalad adag ay ku soo wajahdo haddii aad ku laabato waddankaagii hooyo?

Masuuliyiinta socdaalku waa inay tixgaliyaan dhammaan carruurta ay saamaynta ku yeelatay codsiyada H iyo C, haddii ay ku dhasheen iyo haddaanay ku dhalan Canada.

Ma codsan kartid H iyo C haddii aad sugayso go'aan ku saabsan ku andacoodistaada qaxooti. Haddii ku andacoodistaada qaxootinimo ay guul daraysato, Ma codsan kartid H iyo C muddo 12 bilood oo ka bilaabanta taariikhda go'aanka la diiday ku andacoodistaada, ilaa aad cadayso in naftaadu halis ku jirto arrimahan aawadeed:

- waddankaaga hooyo inaanad ka heli karin daryeel caafimaad; ama
- ka mastaafurintaada Canada ay saamayn xun ku yeelan karto ilamaha. Kani aanu noqonayn ilmahaaga – wuxuu noqon karaa ilmo aad xidhiidh leedihiin oo si toosa ay saamayn ugu yeelan karto mastuurintaadu.

Garyaqaan ayaa kaa caawin kara inaad ka arrinsanto go'aanka ugu wanaagsan xaaladaada.

Gacan ka hadalka iyo si xun ula dhaqanka

Buburka xidhiidhka wuxuu la xidhiidha arrimo badan. Mid ka mida arrimahan waxaa laga yaabaa inuu noqdo gacan ka hadal ama si xun uu kuula dhaqmo lamaanahaagu. Haddii aad u sheegto masuuliyiintaada socdaalka inaad kala kulantay inuu si xun kuula dhaqmay lamaanahaagu ama xubin qoyskaaga ka mid ahi, waxay tixgalin doonaan arrintan markay wadaan hawsha codsigaaga socdaalka si aad u joogto Canada.

Macluumad intaas dhaafsiisan haddii lamaanahaagu uu gardaro badan yahay ama xadgudub badan yahay, soo wac Khadka caawimaada ee Haweenka Gacanta loo qaado:
416-863-0511
1-866-863-0511 (telefanka-bilaa lacagta ah)
1-866-863-7868 (TTY)

Haddii aad khatar degdeg ah aad ku sugan tahay, waxaa haboon inaad soo wacdo booliiska (garaac 911).

Ia xidhiidhista booliiska

Si xun ula dhaqmida haweenku waxay ka soo horjeedaa sharciga ka jira Canada. Haddii ay booliisku rumaystaan in lamaanahaagu uu gacan kuu gaystay, waxay ku soo oogi karaan danbi ka dhan ah isaga ama iyada. Waxay ku soo oogi doonaan xaataa haddii aanad rabin danbi lagu soo oogo. Haddii uu booliisku rumaysto inaad gacan u gaysatay lamaanahaaga, waxaa laga yaabaa in lagu soo dacwadeeyo.

Xaataa haddii aan lagu soo dacwadayn, booliiska, qaryaqaanka dawlada, ama masuul kale oo Maxkamad ayaa oggaan kara inaanad xuquuq sharci ku dhex lahayn Canada ama waxay u sheegi masuuliyiinta socdaalka. Haddiiba ay arrintan dhaco, waa lagu xidhi ama lagu mastaafurin.

Danbi ku helistu waxay saamayn ku yeelan kartaa xuquuqda socdaal ee qofka waxaanay u horseedi kartaa mastaafuris, xaataa haddii aad tahay qof si rasmi ah u degan. Dadka sida rasmiga ah u degan waa la mastaafurin karaa haddii lagu helo danbiyo cad. Haddii lamaanahaaga la mastaafuriyo oo uu ku jiray ama ay ku jirtay markii uu waday hawsha inuu ku kafaalo qaado, xuquuqdaada socdaal ayaa sidoo kael halis gali karta. Haddii aanad ahayn muwaadin Kanadiyaan ah, ood faraha kula jirtid danbi, waxaa haboon inaad ka hesho talo sharci garyaqaan danbi iyo garqaqaan socdaal labadoodaba isla markiiba.

Arrimaha kale ee sharciga qoyska loogu talogalay haweenka muhaajiriinta ah

Haddii adiga iyo lamaanahaagu aad ka soo gasheen Kanada waddan kale, arrimaha sharciga qoysku wuxuu noqon karaa mid ay adag tahay in la fahmo markaad kala tagtaan, Haddii adiga ama lamaanahaagu aad go'aansataan inaad ka tagtaan Kanada.

Waxaa laga yaabaa inay ku soo wajahaan arrimahan caadiga ah:

- la guuris carruur
- la socdaalid carruur
- ilmo qafaalasho
- ka uruurin taageero maaliyadeed qof kale oo ku nool meel
  ka baxsan Ontario

Macluumaad intaas dhaafsiisan oo ku saabsan la guurista carruurta, la socdaalista carruurta, ama ilmo qafaalashada eeg buuggayaga xanbaarsan macluumaadka ku saabsan "Daryeelka Ilmaha iyo awood u helista inaad isticmaasho".

Macluumaad intaas dhaafsiisan oo ku saabsan uruurinta taageerada maaliyadeed, eeg buuggayaga xanbaarsan macluumaadka ku saabsan "Taageerada Ilmaha" iyo "Taageerada Xaasleyda".

Ontario

• *Aragtida warqaddahan lagu soo bandhey waa aragtida FLEW u gaar ah oo ma ahan kuwa ay Gobolka la wadaagto.*

The Law Foundation of Ontario
Building a better foundation for justice in Ontario

• *Inkastoo ay taageero dhaqaale ay kaga timaado Ururka Samafalka Sharciga ee Ontario, waxyaabaha ku qoran daabacaadan muhiim ma ahan oo kama tarjumeyso aragtida Ururka.*

Waxaa jira halis weyn oo rabshado ah goorta xiriir soo jirey uu dhamaanayo. Haddii aad ku jirto halis kugu soo dhow, wac 911. Haddii adiga ama qof kale ee aad taqaano halis ku jiro, booqo www.onefamilylaw.ca si aad u hesho macluumaad taageero ah.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. **Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)**
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir